



Oslo kommune
Renovasjonsetaten

Qashin kala soocidda Haraaga cuntada iyo Baakadaha caagga ah ee Oslo



Haraagga cuntada waxaa lagu ridi bac cagaaran wixii baakado
caaga ahna bac buluuga ah.



Haraaga cuntada waxaa laga samaynayaa bacrimiye-dabiici ah (biogjødsel) iyo shidaal ay isticmaalaan basaska iyo baabuurta.

Baakadaha balaastikada ah waxaa laga samaynayaa waxyaalo cusub oo balaastig ah sida waxyaalaha lagu ciyaaro, kuraas iyo jaakado (fleecejakker). Teeda kale, kala soocidda haraaga cuntada waxay yaraynaysaa caddadda haraaga.



Qashinkaaga waxa ku jira qaybo badan oo anfac leh oo aanad isticmaalin. Hadda degmada Oslo waxay si fiican uga faa'iidaynaysaa kuwaasi iyadoo sidaa daraadeed soo rogaysa in qashinka loo kala hufo baakado-caag ah iyo hadhaa-cunto. Soo rogiddani waxay u dhacaysaa qunyar-qunyar, intaanu dhammaan sannadka 2011-ku dhammaan guryaha Oslo way ka wada qayb-galayaan.

Kala-soocu wuxuu u dhacayaa adigoo ya adigoo hadhaaga-cuntada ku ridayo baco cagaaran wixii baakado-caaga ahna ku ridayo bac buluug ah. Qashinnada kale waxaad ku ridaysaa bacda adeegga taasoo ka dhex muuqata bacaha cagaaran iyo kuwa buluuga ahba. Dhammaan bacaha laba jeer ayaa la guntayaa, waxaana lagu ridayaa haanta qashin-qubka sidii hore oo kale.





Baakadaha-caaga ah:

Ku dhawaad dhammaan baakadaha bacaha ee guryaha dib ayaa loo warshadayn karaa haddii aanay ku jirin walxo-saliid ka samaysan, gubasho u halis ah ama walxo sun ah. Baakadaha caaga ahi waxay noqon karaan qaar jilicsan iyo qaar adagba. Waxa la kala soocayaa waxa ku magac-dhabban yihiin: ma baakadaa, ma caag baa laga sameeyay, dib ma loo warshadayn karaa.

XUSUUSO!

Baakadaha caaga ahi waa inay nadiif ahaadaan oo qalalaadaan marka bacda lagu ridaayo.

Haa mahadsanid:

- Dhalooyinka (aan dib loo iibin)
- Kildhiyo
- warqadda wax lagu duubo
- Baco
- kiishash
- seesar
- koobab
- sanduuqyo
- jalxad-ubax
- jagagacle

Maya mahadsanid:

- Caag aan ahayn baakado (tusaale ahaan ciyaaraha, qaadada iyo faragtada, qalimada, tuunbooyinka, qasabadaha, qalabka kijada)
- baakado caaga oo la dhooqeeyay ama la sumeeyay (tusaale ahaan tuyuubka-kiriimka-cadayga, bacaha mayoonayska, warqado hanbo cunto ku duuban tahay)
- Baakado caag ah oo calaamadda khatartu ku qoran tahay

Si dib-u-warshadayntu u shaqayso, waxaa muhiim ah in dhammaan baakadaha caaga ah ee noo imanayaa ay nadiif ahaadaan oo qalalaadaan.

Si dhakhso u marin burushka-dhaqidada ayay tahay in la sameeyo. Amaba waxay qusaysaa in sida habboon la isticmaalo: Baakada caaga ah haddii ay adag tahay in la nadiifiyo, ku rid dhinaca qashinka.

Qashin:

Inta soo hadha qashinka waxaa lagu ridayaa bacaha adeega kuwaas oo si cad uga duwan bacaha cagaaran iyo kuwa buluuga ah.

Haddii aad ka shaki qabto kala sooca, waxaad qashinka ku ridi bacda qashinka ama waxaad soo wici RENs xafiiska macaamiisha wixii war e intaa ka badan. Qashinka aan geli karin bacda caadiga ah ee adeega (qashin wayn) laguma ridayo haanta qashin-qubka, lakiin waxaa la geynayaa meesha ugu dhow ee dib-u-warshadayn yari ku taal ama xarun-dib-u-isticmaal.

FIIRO GAARA!

Dhammaan saddexda bacood waxaa lagu ridayaa haanta-qashin-qubka.



Hadhaa-cunto:

Hadhaaga cuntada oo keliya ayaa lagu ridayaa bacaha cagaaran. Wixii kale ee qashin noole ah waxaa lagu ridayaa bacda qashinka. Qashinka bustaanka waxaa geyn kartaa halka kuugu dhow ee qabtaha qashin-qubka-beeraha.


Haa mahadsanid:

- hadhaa-cunto guud ahaan
- Qolof/dahaadh
- Diir /qub
- hadhaaga neef la gawracay
- gufar/faar
- caleenta-shaaha
- waraaqaha aftirka
- lafaha

Maya mahadsanid:

- ubax la jeebay
- jalax-geedaha
- qashinka-berta (lagu daray jayga, ciidda iyo carrada)
- Ciidda-bisadda
- xafaayadaha
- hadhaaga-cuntada e wata baakad

Kala-sooca qashinku wuu fudud yahay:



Xusuuso laba gunnudka!



baakada caaga

Xusuuso laba gunnudka!



Qashinka

Xusuuso laba gunnudka!



Hadhaaga-cuntada

Maxaan u kala soocayaa Hadhaaga-cuntada?

Hadhaaga-cuntadu illaa hadda waxaa loo gubaa in tamar laga dhaliyo. Marka la gubaayo wax faa'iido ah kama helno nafaqada cuntada ku jirta. Hadda waxaa tamarta cuntada ku jirta looga faa'iidayaanayaa si fiican waxaana la yaraynayaa karboon-laba-oksiidhka hawada gelaaya.

Waxaynu taas samaynaynaa haddaan geyno qashinka goobta aynu ka soo saari karno gaas-dabiiciya oo loo isticmaali karo shidaalka basaska iyo gawaadhida kale. Isla markaas waxaynu soo saari karnaa bacrimiye-dabiici deegaanka u fiican.

Basaska oo ku socda gaas dabiici ah waxay keenaysaa in hawada magaaladu intaan ka nadiifsanaato sanqartuna ka yaraato.

- Runta gaaska dabiiciga ah ee Oslo waxay soo saaraysaa gaas dabiici ah oo ku filan 170 bas, waxaana markaa CO₂- gii baxayay sanadkiiba hoos loo dhigayaa 10 000 oo tan. Rugtu waxay gaas dabiici ah oo cimilada u roon siinaysaa ilaa 100 beerood (gård) oo dhexdhexaad ah.

Maxaan u kala soocayaa baakadaha caaga ah?

Caagu wuxuu ku habboon yahay in alaabo dib looga warshadeeyo. Baaldiyada, ciyaaraha, funaanadaha-suuf-la-moodka iyo kuraasta xafiiska waa tusaalayaal walxaha caaga dib-loo-warshadeeyay. Waxaa kaloo muhiim ah in caaga dib loo warshadeeyo iyadoo laga fikiraayo arrimaha deegaanka. Maaha oo keliya in caaga ay muddo dheer ku qaadanayso inuu iskii u baaba'o haddii uu lumo, laakiinse sababtu waa marka la samaynayo ayay wasakhayn badan tahay.

- Kiilo kasta oo la soo saarayo waxaa la isticmaalaa laba kiilo oo shidaala
- Kiilo kasta oo dib loo warshadeeyo wuxuu yareeyaa Kaarboon-laba-oksiidhka baxaya qiyaastii-2 kg.
- Dib-u-warshadayntu waxay u baahan tahay tamar ka yar marka la soo samaynayo mid cusub:
 - Dhalo-caag ah oo kasta oo dib-loo-warshadeeyo, waxaa la madhxinayaa koronto iftiimisa guluub 60 waat ah muddo siddeed saacadood ah.

Ilo muhiim ah oo laga heli karo warbixin ku saabsan kala soocidda qashinka

www.gronnhverdag.no

www.renovasjonsetaten.no

www.sortere.no



Tilmaame-kala-sooca



Qashinka-cuntada: Haa mahadsanid: Hadhaaga-cuntad guud ahaa, sida qolofa, diirkja, hadhaaga nef la qalay, caleenta shaaha, faro-qalajiska iyo lafaha.

Maya mahadsanid: Hadhaaga-geedaha, qashinka-berta. Ciidda-bisadda, xafaayadaha iyo baakadaha lagu dhooqeeyay hadhaa-cunto.

Kuwani waxaa lagu ridayaa qashinka caadiga ah sida manta.

Hadhaaga-cuntada waxaa loo sooci bacda cagaaran laguna ridi haanta-qashin-qubka. Xusuuso laba gunnudka!



Baakada caaga: Xusuuso: Dhammaan baakadaha caaga ahi waa inay nadiif ahaadaan oo qalalaadaan marka bacda lagu ridaayo

Haa mahadsanid: Dhalooyinka (aan rahan lahayn), kildhiyada, waraaqda wax lagu duubo, kiishashka, seesarka, koobabka, sanduuqyada, jalxadaha-ubaxa iyo jagagaclaha(isopor).

Maya mahadsanid: Baakad la dhooqeyay, qaado, midi iyo farageeto, ciyaaro iyo kabo ka samaysan caag iyo waxa kale ee ka samaysan caaga. **Baakada caaga ah waxaa loo soocayaa bacda buluuga ah waxana la dhigayaa haanta-qashin-qubka. Xusuuso laba gunnudka!**



Qashinka kale: Inta soo hadha markaad kala soocdo intaad kari karto. Shaki haddii uu kaaga jiro kala sooca, waxaad qashinka ku ridaa bacda qashinka kale ama soo wac RENS xafiiska macaamiisha warbixintii intaa ka badan.

Qashinka kale waxaa lagu ridi bacda adeega oo ka muuqan og kuwa cagaaran iyo kuwa buluuga ahba, waxaana lagu ridayaa haanta-qashin-qubka. Xusuuso laba gunnudka!



Waraaqada: Joornaalada, maagasiinada, waraaqaha-yuulka, xayasiiska, galalka, waraaqaha-koobiga iyo kartoonaada khudrada-miiran, caanaha, dib-u-buuxinta iyo cuntada la barfiyay (ee aanay ku jirin wax hadhaa-cunto ahi). Waxba mal aha haddii warqadda lagu dahaadhay warqad-alamuuniyam, caag ama fur caaga. Tan waxaa kala soocaya mishiin.

Wixii waraaqa waxaa lagu ridayaa haanta-waraaqaha.



Baakada dhalada: Haa mahadsanid: Baakada dhalada aan rahmaad lahayn ee cuntada iyo cabitaanka.

Maya mahadsanid: Dhoobada, quraaradaha, weelka-dhoobada, guluubka-nalka iyo dhalada dab-adkaysiga leh. Baakadaha birta: Qasaca-, khamriga- iyo daasadaha-biyaha-macdanta aan rahmaad lahayn, wixii ka samaysan alumiiniyum, tuunbo, dabool iyo samays-alumiiniyum iyo waraaq-alumiiniyum.

Dhalada- iyo baakada dhalada waxaa la keeni goobta-dib-u-celinta.



Rahmaad: Rahmida dhalooyinku sidoo kale waa kal-soocid. Waxay kordhinayaan in dib loo isticmaalo taasoo keenaysa in wax yar la soo saaro oo qashinku yaraado.

Dhalada rahman waxaad dib u geyn dukaanka.



Qashinka halista ah: Dhaqidda-, ilaalinta-waxa-la beero- iyo walxaha nadiifinta, rinjiga, dheeha, xabagta, baytariyada, baytariyada-saacadaha, laanbadaha, walxaha-gaadhiga, qasaca-biif-baafita iyo haanta-gaasta sidoo kale walxaha korontada iyo elktorooniga (EE). Xusuuso qashinka halista ah in lagu soo celiyo baakadiisa asliga ah. Doorasho kale waxaad adeegsan kartaa baakad kale oo ammaana oo ay ku calaamadsan tahay waxa ku jira.

Qashinka halista ah iyo qashinka-EE waxaa la keenayaa rugta-deegaanka, xarun yar oo dib-u-isticmaal ama rug-dib-u-warshadayn.



Kilde-
sortering
i Oslo



Ma kugu filan tahay kijadu?

Waxaa jirta xalal badan oo fiican oo jaban oo ku saabsan kal-soocidda-qashinka guriga. Haamo ku habboon bacaha kala duwan waxaa la helayaa iyadoo kal jaad ah. Waxaa meesha taal in caqliga laga shaqay-siyo, la eego waxa meesha ku ugu habboon ee gurigaaga dhexdiisa.

Halkan waa tusaalayaal xalalka qaar:

Xalal fudud – baaldiyada iyo surin-baceed:

- Xalalka jaban sida badan waxaa loogu talagalay in la sudho albaabka-khaanadda ama la dhigo sagxadda.
- Waxaa ka faa'iidayasi ahaan lagu kabi karaa xalal kale.
- Waxay ku habboon tahay tusaale ahaan hadhaaga-cuntada , qashinka kale iyo baakadaha-caaga

Xalalka gidaar- iyo sagxad-ku-dhajinta:

- Si fudud ayaa loo isticmaalayaa, waxayse rabtaa in la rakibo iyo iyadoo u baahan goob weyn marka loo eego baaldiyada iyo surin-baceed.
- Waxay aad ugu habboon tahay hadhaaga-cuntada, qashinka kale iyo baakadaha-caaga.

Xalal fikir cusub keenid:

- Isticmaal waxaa hore guriga ugu haysato: salado, jalxado, boorso, haamo, khaanad-kabo,dharsudh iwm.
- Kharashku wuxuu noqonayaa wuxuu qofku rabo.
- Xalalku inta badan waxay ku habboon yihiin qololka kale ee aan ahayn kijada.
- Sanduuqyada-wax-lagu xafido waxay ku fiican yihiin in lagu isticmaalo qashinka qalalan ee baaxadda yar sida waraaqaha/kartoonada, dhalada- iyo baakadaha dhalada iyo dhalooyinka- rahman.

Xalalka inta dadaalaysa:

- Xalal loogu talagalay khaanadaha-kijada ama miis meel hoose lagu sameeyay.
- Way habboon tahay inaad qiimaysid kijo cusub.
- Waa lagu isticmaali karaa noocyada-qashinka oo dhan, xaddayntu waa dhaqaalaha iyo goobta.

Eeg www.renovasjonsetaten.no fikrado intaa ka badan.

Talo:

Xusuuso qashinka qalalan sida dhalada- iyo baakadaha- biraha, dhalada-rahman,baakadaha-caaga iyo weiba waraaqaha in la dhigi karo meelaha kale ee kijada ahayn.



Maxaad samaynaysaa markaad baco badan u baahato?

Bacaha qashin-kala-sooca hadhaaga-cuntada iyo baakadaha caagga waxaad iyadoo bilaash ah ka soo qaadan kartaa dukaammada raashinka ee Oslo intooda badan. Liiska meelaha aad ka soo qaadan karto ka eeg www.renovasjonsetaten.no

- Waxaad sidoo kale baco ka soo qaadan kartaa

Waaxda fayyo-dhawrka goobaheeda dib-u-isticmaalka iyo rugaha yar ee dib-u-isticmaalka. (cinwaanku wuxuu ku yaal bogg xigga).

Tanagga qashinka ha ku ridin qashin aan bacaysnayn iyo qashinka adag midna

- Ku dheji bac midabkaad u baahan tahay haantaada, jaadhiwaluhu wuxuu kuu dhigi baco-isku-duuban oo cusub ood iska leedahay.

Muhiim

Waxaa tanagga qashinka lagu ridayaa haraaga cuntada, baakadaha balaastigga ah iyo qashinka haraaga ah oo keliya. Qashinka aan bacda ku jirin iyo kan adag sida shaagga baaskiilka, ciyaaro burburay i.w.m. tuubbada huufarka iwm laguma ridayo tanagga, , ee waxaa la geynayaa rugahayaga dib-u-isticmaalka.

XUSUUSO

Tanagga qashinka waxaa lagu ridayaa haraaga raashinka, baakadaha balaastikada ah iyo haraaga kale oo keliya.

XUSUUSO
inaad
laba gunuddo!



Degmada Oslo xarunteeda qashin-qubka

Inta badan waxaa la sameeyaa goobo cusub oo rug- dib-u-isticmaal oo Oslo ah. Waxaa intaa dheer waxaa la dhisayaa saddex goobood oo waaweyn oo rugo-dib-u-isticmaal sannadka 2012ka gudihiisa. Maanta qashinka waaweyn waxaa la geeyaa goobta alaab-dib-u-warshadaynta meelaha hoos ku qoran:

Rugta-dib-u-isticmaalka:

- Haraldrud, Brobekkveien 87
- Grønmo, Sørliveien 1

Rug-yarta-dib-u-isticmaalka:

- Sofienberg, Helgesens gate 56-58
- Pilestredet park, Pilestredet Park 7
- Grefsen, Kapellveien 118
- Bentsebjørnet, Bentsebrugata 11C
- Fredensborg, Maridalsveien 10

Waxaa intaa dheer in ka badan 30 rug-deegaaneed oo loogu talagalay qashinka halista ah iyo 600 oo dib-u-celinta dhalooyinka iyo baakadaha-dhalooyinka ah oo ku fidsan magaalada. Eeg bogga netkayaga wixii war intaa ka faahfaahsan.

Mustaqbalka

Qof kasta oo Oslo deggeni wuxuu soo saaraa maanta 383 kg oo qashin-guri ah sannadkii. Qaybtaqashin kala sooceenu waa 64 kg oo waraaqo ah 17 kg o dhalo iyo baakado birta ah. Waynu ka sii wanaajin karnaa

Hiyiga degmada Oslo:


- Inaan guryaha Oslo oo dhan ku soo rognu kala soocidda haraaga raashinka iyo baakadaha balaastigga ah.
- Sannadka 2011ka gudihiisa ugu toban rug-yaro dib-u-isticmaal in laga sameeyo Oslo.
- Waxaa la dhisayaa saddex rugood oo waaweyn oo casri ah oo dib-u-isticmaal ah.
- Goobo badan oo dib-u-celinta dhalooyinka iyo biraha ayaa la samaymaa.
- Sannadka 2014ka waxaa la gaadhsiiyayaa in dib-u-warshadaynta alaabta Oslo laga bilaabo 30 ilaa 50 boqolkiiba.
- Sannadka 2030ka degmada Oslo Kaarboon-laba-oksiidhku ay sii daysaa waxaa laga dhigayaa kal-badh.

Wax-ka-bedelka qashinka-qubka ee Oslo waa kii ugu waynaa ilaa innta la og yahay. Noorway alaab dib-u-warshadaynteedu waxay yaraynaysaa Kaarboon-laba-oksiidhka caalamiga ah 3,9 milyuun oo tan. Xaddiga la sugaayo in la urruriyo baakadaha caaga ah ee Oslo waa 5000 oo tan sannadkii. Macnaheedu waa yarayn shidaal-isticmaalka samaynta caaga ee 10 000 oo tan.

Shaqadaada qabo, taayadaanu qabanaynaa.
Wadajir ahaan Oslo shaqada ugu muhiimsan ayaynu u qabanaynaa.



Sidan ayaa qashinka loo urrurinayaa, loo kala soocayaa oo loo hagaajinayaa:



BAC BULUUG AH
=
baako caaga



BAC CAGAARAN
=
hadhaa cunto



Warbixintan luqado kale ayaad ku akhrisan kartaa
www.renovasjonsetaten.no



Arrintan si tillaabo-tillaabo ah ayaa loo soo rogayaa, guryaha Oslo
oo dhanna waa lagu soo rogayaa

Waxaa kal socon kartaa halka uu mashruucu maraayo www.renovasjonsetaten.no

Xusuusana inaad maantaba wax badan aad sii kala qashin-sooci karto.

Su'aalaha ku saabsan qashin-kala-soocidda Oslo?
Wac 02 180 • facebook.com/kildesortering.i.oslo

Waaxda faya-dhowrka, pb 4533 Nydalen, 0404 Oslo. Telefoonka macaamiisha: 23 48 36 50